Waaxda Ganacsiga ee Minnesota waxay ku dhiirigalinaysaa kumanaan qoysas oo reer Minnesota ah inay codsadaan $167 milyan ee ah maal-gelin cusub oo loogu talagalay Barnaamijka Caawinta Tamarta

Luuliyo 2021

Waaxda Ganacsiga ee Minnesota waxay heshay $167 milyan oo dheeraad ah ee ah maalgelinta federaalka taas oo loo marayo Xeerka Qorshaha Samatabbixinta Mareykanka (American Rescue Plan Act) si loogu maalgeliyo Barnaamijka Caawinta Tamarta ee Minnesota. Taa daraadeed, barnaamijku wuxuu u furan yahay codsashada sanadka oo dhan. Waaxdu waxay ku dhiirigalinaysaa kumanaan qoysas oo reer Minnesota ah inay codsadaan, gaar ahaan kuwa leh biilasha tamarta ee hore ee aan wali la bixin ee halista ugu jira in laga gooyo korontada iyo gaaska.

Ku dhowaad 340,000 qoysas reer Minnesota oo ay u adeegaan shirkadaha korontada iyo gaaska ee la xakameeyey waxay haystaan biilal hore ee aan wali la bixin ee ah korontada iyo gaaska, iyagoo lagu leeyahay ilaa iyo $140 milyan, sida uu sheegay Guddiga Adeegyada Korontada iyo Gaaska ee Dadweynaha ee Minnesota. Bishii Maajo Guddiga Adeegyada Korontada iyo Gaaska ee Dadweynaha waxay qaaday xayiraada xaalada degdegga ah ee wakhtiga-nabada ee cudurka faafa ee ka mamnuucaya shirkadaha korantada iyo gaaska ee la xakameeyey inay macaamiisha leh biilal hore ee aan wali la bixin ka gooyaan adeegyada. Shirkadaha korontada iyo gaaska wax durba bilaabeen inay ogeysiiyaan macaamiisha leh biilasha hore ee aan wali la bixin in laga yaabo in laga gooyo korontada iyo gaaska laga bilaabo sida ugu dhaw ee ah Ogosto 2.

Waaxda Ganacsiga waxay sameyneysaa iskuduwid shirkadaha korontada iyo gaaska iyo ururada bulshada dadaal gobolka-oo-dhan ah si loogu dhiirigaliyo reer Minnesota ee biilasha ku harsanyihiin ama fooda saaraya in laga gooyo korontada iyo gaaska inay codsadaan barnaamijka Caawinta Tamarta ee Minnesota.

Qoysaska waxay u heli karaan ilaa iyo $1,600 biilasha tamarta iyo waxaa laga yaabaa inay u qalmaan $1,200 oo dheeraad ah si ay ugu daboolaan biilasha hore ee aan wali la bixin.

Adigoo codsanaya caawinta tamarta, qoysaska reer Minnesota waxay u qalmi karaan Barnaamijka Caawinta Cimilayta ee Minnesota si ay ugu bixiyaan hagaajinta guriga oo lacag la'aan ah si loo keydiyo tamarta iyo si joogto ah loogu yareeyo kharashka ku baxa tamarta gurigaa.

"Waxaan rabnaa kumanaanka reer Minnesota ee dib uga dhacay bixinta biilalkooda korontada iyo gaaska inay ogaadaan inay haystaan xulashooyin ah inay u daarnaato korontada gurigooda," ayay tiri Wakiilada Ganacsiga Grace Arnold. "Codso Caawinta Tamarta maanta si aad caawimaad ugu hesho biilashaada iyo, haddii aad u qalanto, in biilashaada tamarta si joogto ah hoos loogu dhigo Barnaamijka Caawinta Cimilaynta."

Reer Minnesota waa inay **hadda codsadaan** Barnaamijka Caawinta Tamarta. Codso foomka codsiga ama hel bixiyaha adeega ee deegaankaaga: Wac 800-657-3710 oo riix lambarka 1 ama tag online-ka: mn.gov/commerce/eap.jsp ama ka raadi online-ka "Minnesota Energy assistance"

Xaqiiqooyin muhiim ah oo ku saabsan Barnaamijka Caawinta Tamarta ee Minnesota:

- Milkiilayaasha-guri ***iyo kireystayaasha*** ayaa u qalmi kara kaalmada tamarta.
- Waaxda Ganacsiga waxay sare u qaaday heerka dakhliga ee qoysaska si ay ugu qalmaan, sidaa darteed **qoysas ka sii badan mar walba ee hore ee reer Minnesota ah ayaa u qalma caawinta tamarta**. Tusaale ahaan, qoys ah afar qof wuxuu heli karaa dakhli sanadle ah oo gaaraya $65,228 si ay u qalmaan.
- Qoysaska reer Minnesota ee codsaday Barnaamijka Caawinta Tamarta ee haysta codsi sugaya ansaxin ama la ansaxiyay waa **laga ilaalinayaa ka goynta korontada iyo gaaska illaa iyo Abriil 2022.**
- Adeegyada waxaa ka mid ah bixinta biilasha hadda ah iyo kuwa hore ee aan la bixin ee ah korontada, gaaska iyo tamarta propane (gaaska dareeraha ah), u keenida shidaalka degdegga ah, dayactirka/beddelida nidaamyada kuleylinta ee halaysan ee milkiilaha-guriga.
- Codsiga Barnaamijka Caawinta Tamarta waa isla kan lagu go'aaminayo haddii qoysku u qalmi doono adeegyada Barnaamijka Caawinta Cimilaynta, kaas oo siinaya casriyeynta tamarta guriga ee lacag la'aanta ah milkiileyaasha-guri iyo kireystayaasha dakhli-ahaanta ugu qalma si ay uga caawiso keydinta tamarta iyo hubinta in gurigaagu yahay goob caafimaad iyo badbaado leh ee lagu noolaado.
- Lacag bixinta biilasha tamarta waxaa si toos ah loogu diraa shirkadda korontada iyo gaaska ee qoyska, oo waxay noqon kartaa ilaa iyo $1,600, oo ay la socoto $1,200 dheeraad ah oo qoysku u qalmi karo si loogu daboolo biilasha hore ee aan wali la bixin.
- Qoysaska sidoo kale waxay helayaan waxbarasho ku saabsan isticmaalka tamarta ee hufan iyo nabadgelyada leh.
-

Macaamiisha leh biilasha korantada iyo gaaska ee hore ee aan wali la bixin: La xiriir shirkaddaada korontada iyo gaaska si aad uga codsato inay kuu dejiso qorshe dib loogu bixiyo lacagta. Shirkadaha korantada iyo gaaska ee la xakameeyey kama qaadi doonaan kharash iyo ganaax ah la daahida bixinta lacagta macaamiisha la galay oo u hoggaansama qorshe dib u bixinta lacagta. Si aad u hesho caawinaad dheeraad ah, Xafiiska Arimaha Macaamiisha ee PUC ayaa la heli karaa si uu kaaga jawaabo su'aalaha iyo inuu bixiyo adeegyada dhexdhexaadinta macaamiisha: Wac 651-296-0406 ama 1-800-657-3782, ama emayl u soo dir customer.puc@state.mn.us.

Waxaa jira siddeed shirkadood oo la xakameeyey, oo ay layhiin maal-gashadayaal ee bixiya gaaska ama korantada gudaha Minnesota: CenterPoint Energy, Dakota Electric Association, Great Plains Natural Gas Co., Greater Minnesota Gas, Minnesota Energy Resources Corporation, Minnesota Power, Otter Tail Power, iyo Xcel Energy .

Waan Kula Jirnaa/Kula Soconaa Maalin Walba

Ujeeddada Waaxda Ganacsiga ee Minnesota waa inay ilaaliso dhammaan reer Minnesota markay sameenayaan isweydaarsigooda maalin laha ah ee maaliyadeed iyada oo ku sameynaysa baaritaan iyo qiimeyn adeegyada, una

doodaysa inay noqdaan wax si caddaalad ah ku socda, la heli karo, iyo la awoodi karo. Meel kasta oo aad ka joogtid Minnesota, Waaxda Ganacsiga ayaa kula jirta/socota maalin walba. Haddii ay tahay marka aad buuxsaneyso bansiinka/gaaska, iibsaneyso guri, ka shaqeynaysid yareynta isticmaalka tamarta ama wax dib u dhisaysid musiibad dhacdo ka dib—waanu kula jirnaa/kula soconaa, sidey ahaataba. Waaxda Ganacsiga ee Minnesota waxay maamushaa in ka badan 20 shirkadaha la xakameeyay, iyadoo hubinaysa in ganacsiyada Minnesota ay xoogan yihiin iyo in macaamiisha Minnesota la ilaaliyo. Wax sii badan ka baro mn.gov/commerce.

XIRIIRKA WARBAAHINTA:
Mo Schriner, Agaasimaha Isgaarsiinta (Director of Communication)
651-363-1227 | mo.schriner@state.mn.us